



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka**

**Hadal-qoraalka kalfadhiga 5-aad
Documentiga Kol.4-aad/kul.12-aad**

02/12/2014

Kalfadhiga 5-aad

Kulankiisa 12-aad Saac.Fur.11:00gh-Saac.Xir.11:25gh.

Guntinta(Qourum)-207-208

Ajendaha:

1)furitanka Ayadaha Qura'anka

2)Ansixinta ajandaha

**3)Dhaarin xildhiban kursiga ubaneeyay xil shariif xasa'ekh Adan. Xil cusub
c/qaadir xasan sheekh Aadan**

4)mowshinka kalsooni kala noqoshada xukumada

5)Qaybinta miisaaniyadda 2015

**6)Qeybinta Hindise sharciyeedka guddiga madaxa banan ee xududaha iyo
fedralka**

Shir-guddoomiye Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS. Mudane Maxamed Sheekh
Cusmaan Jawaari.

Waxaa shirka furey Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS, Mudane Maxamed Sheekh
Cusmaan Jawaari waxaana lagu frey Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah uuna
akhriyey Xildhibaan Ibraahim Saalax Dhayfalah.

1)-Shir-guddoomiye guddoomiyaha barlamanka mudane maxamed sheekh cusmaan jawaari waxa lagu furay Aayadaha Qura'aanka kariimka uuna akhriyay xildhibaan Ibraahim Saalax Dheyfalah.

Guddoomiyaha Golaha shacabka wuxuu sheegay in ajandaha la ansixiyo, xildhibanada way ansixiyeen

2)intaa kadib wuxuu sheegay kursiga uu baneeyey xil shariif xasan sheekh Aadan oo lagu bedelay xil c/qaadir shariif xasan sheekh Aadan ,waxana dhaariyey xil.Ibraahim Saalax Dheyfalah.

Xil.Maxamed C/Ilaahi Fadhayo(point of order),wuxuu sheegey in Motionka la qeybiyey lagu soo daro Magacyadda Xildhibaanadii Motionkaan keeney Guddoomiyaha wuxuu sheegay in arinkaasi uu tafaasiil ka bixindoono Guddoomiye K/Xigeenka 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad. Mudane Mahad wuxuu sheegey in Qod 73-aad ee Dastuurka uu sheegayo in markii motionka la keeno kadib la soo gudbiyo Magacyadda Xil. Motionka keenay.

Guddoomiyaha wuxu kaloo sheegey in ay u yeereyn maalinta berito ah Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasiirka Arimaha Gudaha ,in ay ka hor akhriyaan Golaha Shacabka akhrinta kowaad ee Hindise Sharciyeedka Xuduudada iyo Federaalka iyo Miisaaniyadda 2015ka.

Arinta kale ,ee Motionka kala noqoshada Xukuumadda la akhrindoono Maalinta khamiista ah iyo Xildhibaanadii soo saxiixey ,wuxu intaa ku darey in la shaqeyndoono labada gelin Seddexda maalmood oo kala ah Arbaco,Khamiis iyo sabti .iyo inuusan u dhaafin Motionkaan maalinta sabtida ah.

Shir-guddoomiye ,Guddoomiyaha Golasha Shacabka Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari ,wuxuu sheegey in Shirka xiranyahay Saacadu markey aheyd11:25gh.